| Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliiska Minneapolis | Tiro: 10-200 |
|---|---|
| **Cadadka Tobnaad - Baaritaannada** | |
| **Nidaamyada Baaritaanka** | |

## 10-215 Maamulka Gobolka ee Hanti La wareegidda

(State Administrative Forfeiture) (03/01/11) (xx/xx/23)

### I. Ujeedo

Xeerka MN Qaybta 609.531 wuxuu u baahan yahay MPD du inay dejiso oo ay dhaqangeliso siyaasad qoran si ay u qeexdo hababka ugu wanaagsan ee wax-ka-dhaafka iyo in la hubiyo in si isku mid ah loogu dhaqmo sharciyada hanti-lawareegidda ee gobolka oo dhan.

### II. Siyaasadda

**A.** Waxay noqon doontaa siyaasadda Waaxda Bilayska Minneapolis (MPD) in dhammaan shaqaalaha MPD, dhammaan shaqaalaha MPD loo xilsaaray guddi hawleed kale oo sharci fulinta ah iyo dhammaan shaqaalaha loo xilsaaray hay'ad ka baxsan sharci fulinta guddi hawleed kaas oo MPD ugu adeegto sidii wakiil maaliyadeed, waa inay raacdaa dhammaan sharciyada gobolka iyo sharciyada federaalka ee la xiriira diyaarinta hantida.

**B.** Saraakiisha ku hawlan kara isticmaalka la wareegidda maamulka hanti gudashada waajibaadkooda shaqo ayaa waxaa tababar siinaya MPD da iyadoo la tashanaysa hay'adda dacwadda oogaysa Tababarka noocan oo kale ah waa in la qabtaa mar kasta oo la beddelo siyaasadda MPD da ama wax laga beddelo iyadoo lagu salaynayo awaamiirta maamulka, isbeddelada qaanuunnada sharci dejineed iyo/ama go'aamada maxkamadda la xariira. Tababarka waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xaddidnayn: Siyaasadda MPD, hagitaannada, waxbarashada fasalka ama elektaroonigga ah.

### III. Definitions

**Lacag caddaan ah**: Lacag qaab biilal ah ama qadaadiic ah, jeegagga safarka, dalabaadka lacagta, jeegagga ama noocyada kale ee lacagta elektarooniga ah ama kaararka qiimahu kaydsan, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn kaararka hadiyadda, kaararka debitka, kaararka hadiyadda /caddaymada ama aaladaha kale ee maaliyadeed gorgortanka ah. Kuma jiraan jeegaga gaarka ah.

**Qalabka gudbinta:** Qalab loo isticmaalo gaadiidka oo ay ku jiraan, laakiin aan xaddidnayn, baabuur, tareelle, baaskiil, mootooyinka barafka, diyaarad iyo doon wayn iyo qalab kasta oo ku xiran. Erayga "qalabka gudbinta" kuma jirto hanti, taas oo ah, dhab ahaantii, lafteeda la xaday ama loo qaatay si sharci darro ah.

**Hubka/ rasaasta/Agabka hubka:** waa erey macnihiisu yahay isu-gayntya madfaca iyo rididiisa. Agabka waxaa ka mid ah laakiin aan ku koobnayn galka, kuwa qoriga daboola, waynaysada qoriga, aaladaha dhawaqa xakamaysa, agabka nadiifinta, iwm.

**Hanti la wareegid:** Habka lahaanshaha sharciga ah ee hantida loogu wareejiyo dowlad ama hay'ad kale.

**Dib u Eegista Hantida Lala Wareegay**: Shaqaale MPD ah oo masuul ka ah inuu dib u eego dhamaan kiisaska la waayay waana xidhiidhka ka dhexeeya MPD iyo xafiiska xeer ilaalinta.

**Soo Gudbinta Hanti la wareegidda**: Foomka uu oggol yahay sharciga gobolka, waa in ay buuxiyaan saraakiishu oo ay u gudbiyaan Dib u eegaha Hantida Lala wareegay

**Foomka Ogeysiiska La wareegidda iyo Ujeedada la wareegidda Hantida:** Foomka ay buuxiyeen saraakiisha wakhtiga hantida lala wareegay; in loo qaybiyo sida lagu faray foomka. Foomka Ogeysiiska La wareegidda iyo Ujeedada la wareegidda Hantida ayaa diyaar u ah la wareegidda si gaar ah loogu sameeyay: Dambiyada Walxaha La xakameeyo, Hawl-galka sakhraansanayaasha, dhillaysiga, rasaasaynta uu baxsadku xigo iyo ka baxsadka sarkaalka Booliiska.

**Dahabka/Biraha Qaaliga ah/Dhagaxda Qaaliga ah:** Erayga "Biraha qaaliga ah/dhagaxa qaaliga ah" waxa ku jira walxo dahab ah sida faraanti, katiinadda qoorta iyo saacado si macquul ah ugu muuqda in ay ka samaysan yihiin biro qaali ah ama dhagaxyo qaali ah. Biraha qaaliga ah waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn dahab, qalin, balaatiman, iraadiyam iyo balaadinam. Dhagaxyada qaaliga ah, oo inta badan loo yaqaan dhagaxyada qiimaha badan, waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn dheeman, emeraaldi iyo ruubis.

**Foomka Liiska Hantida:** Foom la buuxiyay marka la qaadayo agabka liiska ee hantida iyo caddaynta. Nuqulka asalka ah waxaa lagu hayaa Hanti iyo Caddeyn.

**Foomka caddaynta Hantida**: Foom saddex nuqul ah oo ay buuxiyeen saraakiishu wakhtiga hantida la qabsaday; in loo qaybiyo sida lagu faray foomka.

**La wareegidda:** Falka ay saraakiisha sharcigu ku qaataan hanti, oo ay ku jiraan lacag caddaan ah, baabuur, iwm. oo loo adeegsaday ama lagu helay falal sharci darro ah.

## IV. Nidaamyada Baaritaanka

### A. Dembiyada Walxaha la xakameeyey

1. Kuwa soo socdaa waxay ku qasban yihiin in lala wareego sida uu dhigayo sharciga MN qaybta 609.5314 Maamulka Hantida Lala wareegay ee hantida qaarkeed La Qabtay iyada oo lala xidhiidhinayo Qabashada Walaxda La Xakameeyay:

    a. Dhammaan lacagta wadarta oo $1,500 ama ka badan, biraha qaaliga ah, iyo dhagxaanta qaaliga ah ee ay jirto sabab macquul ah oo la rumaysto inay u taagan tahay lacagaha ka soo baxa dembi walaxda la xakameeyey;

b. Dhammaan lacagta lagu helo meel u dhow walxaha la xakameeyey marka ay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino in lacagta lagu bedeshay iibsashada walaxaha la xakameeyey;

c. Dhammaan aaladaha gudbinta ee ay ku jiraan walxaha la kontoroolo ee qiimaha tafaariiqda ah ee $100 ama ka badan haddii ay jirto sabab macquul ah oo lagu rumaysan karo in qalabka gudbinta loo isticmaalay gaadiidka ama kala badalidda walaxaha la xakameeyay ee loogu talagalay qaybinta ama iibinta.

d. Dhammaan hubka, rasaasta iyo qalabka hubka ee la helay:

i. Qalabka gudbinta ee loo isticmaalo ama loogu talagalay in lagu isticmaalon si loogu galo ama lagu fududeeyo samaynta dembi culus oo ku lug leh walaxaha la xakameeyey;

ii. Agjooga ama u dhow qofka laga soo qabtay xaddi dambiyeedka walaxaha la xakameeyey; ama

iii. goobta lagu qabto walaxaha la xakameeyo lagu qabtay, haddii lahaanshaha ama iibinta walaxaha la xakameeyay waxay noqonaysaa dembi sida uu dhigayo MN Statute cutubka 152.

2. Marka hanti kasta sida lagu sheegay qaybta sare la qabto, haddii sarkaalka nabad-ilaalinta samaynaya la wareegidda waa inuu u diyaariyaa dukumentiyadan soo socda qof kasta oo hanti lagala wareegayo:

- Foomka "Ogaysiinta la wareegidda iyo Ujeedada laga leeyahay in Hanti Lala wareego- Dembiyada Maandooriyaha la Xakameeyay". Foomkan waa in la buuxiyaa si loogu daro kuwan:
    - Liis qeexaya shay kasta oo la qabtay
    - Magaca qofka la siiyay Ogeysiiska
    - goobta lagula wareegay
    - xilliga lala wareegay
    - lambarka Kiiska MPD-da
    - saxeexa, taariikhda, iyo goobta ogeysiiska lagu soo gudbiyay (waxaa qoray sarkaalka nabada qabanaya la wareegidda).
- Foomka rasiidka hantida. Foomkan waa in si faahfaahsan loo buuxiyaa. (Marka lagu daro bogga 5aad, marka ay khuseyso.)
- Foomka Gudbinta La wareegidda sharciga ah. Foomkan waa in si faahfaahsan loo buuxiyaa.
  Xusuusin: Tixraaca warbixinta kuma filna.
- Warbixinta booliiska iyo qoraal sheeko ah oo sharaxaya sababta suurtagalka ah ee la wareegidda oo ay ku jirto nooca iyo miisaanka walxaha la xakameeyey iyo

DRAFT

natiijada tijaabada goobta. (*Sidoo kale eeg*, ***La wareegidda Maamuleed - Warbixinta Shuruudaha Qorista***)

3. Shakhsiga hantida lagala wareegayo waa in la siiyaa fursad uu ku saxeexo foomka ogeysiiska la wareegidda.

    - Haddii qofku diido, sarkaalka nabada ee qabanaya la wareegidda waa inuu calaamadiyaa sanduuqa ku habboon ee muujinaya diidmada saxeexa.

4. Nuqul ka mid ah Ogeysiiska la wareegidda iyo Ujeedka in laga tago Foomka Dembiyada Walxaha la Xakameeyay ee Hanti iyo nuqul ka mid ah rasiidka hantida waa in la siiyaa shaqsi kasta oo la gaarsiiyay.

    a. Haddii hanti lagala wareego dad badan, foomam kala duwan waa in loo buuxiyaa shaqsi kasta.

5. Dhammaan hantida lagu hayo lagana baaraandegayo in lagala wareego MPD waa in lagu hayaa gacanta MPD.

6. Sarkaalka samaynayaa la wareegidda waa inuu u gudbiyaa Dib u eegisaha Hantida Lala wareegay waxyaabaha soo socda 5 maalmood gudahooda:

    - Ogeysiiska Qabashada iyo Ujeedada laga leeyahay Foomka Dembiyada Walxaha la Xakameeyay ee Hanti (nuqullo asal iyo nuqullo basali ah)
    - Foomka rasiidka hantida (nuqullo asal ah iyo nuqullo basali ah)
    - Foomka Soo Gudbinta La wareegidda

7. Sarkaalka nabadeed ee qabanaya qabashada waa in uu ku wargeliyaa Dib-u-eeggaha Hantida Lala wareegay ee lagu qiyaasay qiyaasta tafaariiqda ee daroogada laga helay meel u dhow hantida la qabtay.

8. Qabashada hantida aan kor lagu xusin waa in la diyaariyaa, dib u eegis lagu sameeyaa oo uu go’aamiyaa kormeeraha cutubka.

9. Dib u Eegaha Hantida Lala wareegay/la qatay waa in uu u gudbiyaa horjoogaha kiiska billaabay dhamaan isbedelada heerka la wareegidda

## B. Lacag caddaan ah oo ku jirta Dambiyada Walxaha La Xakameeyey

1. Lacagta caddaanka ah lama qabsan karo haddii ay leedahay qiimo isku-darkeedu ah oo ka yar $300.00 ilaa lacagaha iibka ah ee horay loo diiwaangelliyay lagu daro lacagta caddaanka ah ee la qabtay.

2. Saraakiishu waa inay baadhaan dhammaan lacagta caddaanka ah ee la qabto si loo go'aamiyo inay ku jirto wax lacag ah oo wax lagu gato. Marka lacagaha wax lagu iibsado la helo:

   a. Nuqul ka lacagta la helay ee iibsiga iyo nuqulka liiska agabka.

   b. Ku soo celi lacagaha la helay akoontada wax iibsiga ee cutubka ku habboon.

   c. Dukumeentiga ku jira Warbixinta Booliiska ee hoos timaada CCN ta saxda ah ee lacagaha wax iibsiga ee la helay.

3. Lacagta caddaanka ah waa in dib loo tiriyaa oo caddadka uu xaqiijiyaa shaqaale kale oo MPD ah. Baqshadda lacagta caddaanka ah iyo/ama rasiidhka alaabada waa in la wada saxeexaa.

   - Haddii la helo kala duwanaansho, Foomka Ogeysiiska la doonayo in lagala wareego dembiyada Maandooriyaha la xakameeyey iyo foomka rasiidka hantida waa in dib loo soo saaraa.

4. Dhammaan lacagta caddaanka ah ee lala wareegayo ee la qabto waxay noqonayaan hanti lagu diiwaan gelliyo Hanti iyo Caddayn si waafaqsan P&P 10-401 ee Hanti iyo Caddaynta.

   a. Foomka Liiska Hantida waa in lagu qeexaa wadarta cadadka lacagta caddaanka ah ee laga qabtay qof kasta.

   b. Foomka Liiska Handida sidoo kale waa inuu ka koobnaadaa sharraxaad faahfaahsan oo dhammaan jeegagga ah, dalabaadka lacagta iyo/ama jeegagga socotada ama agabka kale ee maaliyadeed.

**C. Hanti aan ahayn Lacag caddaan ah oo ku jirta Dembiyada Walxaha la xakameeyey**

1. Dahabka, biraha qaaliga ah iyo/ama dhagxaanta qaaliga ah ee la qabtay waa in ay ahaadaan hanti lagu diiwaan gelliyay qolka Hantida/caddaymaha si waafaqsan P&P 10-401 Hantida iyo Caddaynta.

2. La wareegitaanka Aaladda gaadiidka

   a. Ka dib marka lala wareego, dhammaan aaladaha gaadiidka waa in isla markiiba la geeyaa meel ammaan ah oo loo qoondeeyey ama meel ay oggolaatay MPD da.

   b. Saraakiishu waa in ay diiwan gelliyaan agabka gudbinta iyo waxa ku jira si waafaqsan siyaasadaha MPD ee lagu dabaqi karo.

   c. Haddii darawalka, helay ogeysiiska la wareegidda, uusan ahayn milkiilaha diiwaangashan sida uu qabo MN DVS, Dib u eegaha Hantida Lala wareegay waa in uu milkiilaha diiwaangashan u diraa ogeysiis la wareegidda ah ugu diraa boosto la hubo 60 maalmood gudahood laga bilaabo la wareegidda, iyadoo la raacayo sharciga MN qaybta 169A .63 qaybta 8 (b) La-wareegidda Baabuurka, Habka La-wareegidda Maamulka.

DRAFT

3. Hubka la qabtay, rasaasta ama agabka hubka ee la qabto waa in ay ahaan hanti la diiwaan gelliyay si waafaqsan P&P 10-401 Hantida iyo Caddaynta.

**D. Gaadhi loo Qaatay Dhillaysiga**

1. Baabuurtu wuxuu mutaysanayaa in lala wareego sida uu dhigayo sharciga MN 609.5312 Qaybta. 3 (Gaadiidka lagula wareego dembiyada dhilleysiga) haddii baabuurka loo isticmaalay in lagu sameeyo ama lagu fududeeyo, ama loo isticmaalo inta lagu guda jiro xadgudubka MN Statute 609.324 maalgeliyaha; Dhillooyinka; Guryeynta shakhsiyaadka ku lug leh dhilleysiga; Ciqaabaha

2. Qabashada baabuurka ee dembiga dhilleysiga waxa la qaban karaa oo keliya haddii milkiilaha gaadhiga ku diiwaan gashan uu joogo.

3. Marka gaadhi lagu qabto dhillaysi, sarkaalka nabadda ee samaynayaa qabashada waa inuu buuxiyaa foomka "Xadhiga Dhillaysiga - Ogeysiiska Qabashada Baabuurta". Foomkan waa in si dhammaystiran loo buuxiyaa oo isla markiiba la soo daabacaa.

4. Shakhsiga lagala wareegayo hantida waa in la siiyaa fursad uu ku saxeexo foomka ogeysiiska la wareegidda.

    - Haddii qofku diido, sarkaalka nabada ee qabanaya waa inuu ku caddeeyaa foomka, diidmada saxiixa.

5. Foomka waa in isla markiiba loo qaybiyaa sida lagu faray foomka maadaama milkiilaha baabuurku uu xaq u leeyahay dhegaysa 96 saacadood gudahood ah, sida ku cad Xeerka MN 609.5312 Qodobbada 3(b) La wareegidda Hantida La Xidhiidha Dembiyada La tilmaamay, Gaariga loola wareego Dembiyada Dhillaysiga.

    - Faakis ku socda xafiiska xeer ilaaliyaha magaalada Minneapolis
    - Faakis ku socda Hantida iyo Cadaymaha Minneapolis
    - Nuqul cad oo loo dirayo Dib u Eegaha Hantida Lala wareegay
    - Nuqul Jaale ah oo loo diro milkiilaha gaadhiga ku diiwaan gashan

6. Haddii darawalka, ee la siiyay ogeysiiska la wareegidda, uusan ahayn milkiilaha diiwaangashan sida uu qabo MN DVS, Dib-u-Eegaha Hantida Lala wareegay/La Qabtay wuxuu u siin doonaa milkiilaha diiwaangashan ogaysiis la wareegidda isagoo u soo marinaya boosto la hubo iyadoo la raacayo qodobka MN Statute 169A.63 qaybtiisa 8 (b) Baabuurka La-wareegistiisa, Habka La-wareegidda Maamulka.

**E. Gaadhida oo lagula wareegay Howlgalka wadayaasha Sakhraansan (DUI)**

1. Baabuurtu waxa mutaysanayaan in lala wareego sharci ahaan sida uu dhigayo sharciga MN 169A.63 faqradiisa Subd 2 ee Gaadhiga Lala wareegay, dhacdada la wareegidda ee xidhiga sharciga ee xad gudubka loo qoondeeyay cabista khamriga iyo wadista baabuurta.

DRAFT

2. Marka gaadhi lagu qabto hawl-gal sakhraansanayaasha, sarkaalka nabada samaynaya wareegidda waa in uu buuxiyaa foomka "Hawlgalka sakhraansanayasha - Ogeysiiska Ujeeddada la wareegidda Maamulka Gaadhigu ". Foomkan waa in si dhamaystiran loo buuxiyaa.

3. Shakhsiga lagala wareegayo hantida waa in la siiyaa fursad uu ku saxiixo foomka ogeysiiska la wareegidda.

    - Haddii qofku diido, sarkaalka nabada ee qabanaya waa inuu ku caddeeyaa foomka, diidmada saxiixa.

4. Foomka waa in loo qaybiyaa sida ku qoran foomka.

    - Nuqulada Caddaanka iyo basaliga waxaa la siinayaa Dib u Eegaha Hantida Lala wareegay
    - Nuqulka jaalaha ahna waxaa la siinayaa darawalka gaariga

5. Haddii darawalka, la siiyay ogeysiiska la wareegidda, uusan ahayn milkiilaha ku diiwaangashan sida uu qabo MN DVS, Dib-u-eegaha Hantida Lala-wareegay/la qabtay ayaa gaarsiin doona mulkiilaha diiwaangashan ogeysiis la wareegidda isagoo u soo marinaya boosto la hubo iyadoo la raacayo qodobka sharciga MN Statute 169A.63 Subd. 8 (b) Baabuurka La-wareegistiisa, Habka Maamulka La-wareegidda.

**F. Baabuurka Loola wareegay Sababo La Xiriira Baxsad**

1. Baabuurtu waxay mutaysanayaan in lala wareego sida uu dhigayo sharciga MN qaybta 609.5312 Hantida lala wareegay ee laxidhiidha Dembiyada La tilmaamay hadii gaadhiga loo isticmaalay in lagu sameeyo ama lagu fududeeyo, ama la isticmaalo inta lagu guda jiro jebinta Xeerka MN qaybta 609.487 Sarkaalka Nabada ee cayrsiga; Baabuurka; Mid kale.

2. Marka gaadhi loo qabto inuu la baxsaday sarkaalka bilayska, sarkaalka nabada samaynaya qabashada waa in uu buuxiyaa foomka " Ogeysiiska la wareegidda gaadhi ka baxsaday askari bilays ah" Foomkan waa in si dhamaystiran loo buuxiyaa oo isla markiiba la soo saaraa.

3. Shakhsiga lagala wareegayo hantida waa in la siiyaa fursad uu ku saxeexo foomka ogeysiiska La wareegidda.

    - Haddii qofku diido, sarkaalka nabada ee qabanaya waa inuu ku caddeeyaa foomka, diidmada saxiixa.

4. Foomka waa in isla markiiba loo qaybiyaa sida lagu faray foomka maadaama milkiilaha baabuurku uu xaq u leeyahay dhegaysi 96 saacadood gudahood ah, sida ku cad Xeerka MN qaybta 609.5312 Qodobbada 4(b) Hantida lala wareegay ee laxidhiidha Dembiyada La tilmaamay, Gaadhida loola wareegay inuu ka cararay Sarkaalka Nabadeed.

- Faakis ku socda xafiiska xeer ilaaliyaha degmada Hennepin
- Fakis ku socda La wareegidda/Dib u eegaha Hantida Lala wareegay
- Nuqul ku socda darawalka baabuurka

5. Haddii darawalka, la siiyay ogeysiiska la wareegidda, uusan ahayn milkiilaha ku diiwaangashan sida uu qabo MN DVS, Dib-u-eegaha Hantida Lala-wareegay/la qabtay ayaa gaarsiin doona mulkiilaha diiwaangashan ogeysiis la wareegidda isagoo u soo marinaya boosto la hubo iyadoo la raacayo qodobka sharciga MN Statute 169A.63 Subd. 8 (b) Baabuurka La-wareegistiisa, Habka Maamulka La-wareegidda.

**G. Gawaarida lala wareego ayaga oo kujira rasaasaynta uu baxsadku xigo**

1. Baabuurta waa la qaban karaa waxaana loo malaynayaa sida uu dhigayo qodabka sharciga MN 609.5318 ee loo Gawaarida loo isticmaalo rasaasaynta uu baxsadku xigo in ay muteysan doonto kala wareegid maamul hadii baabuurka loo isticmaalay in lagu sameeyo ama lagu fududeeyo, ama loo isticmaalo inta lagu guda jiro jebinta sharciga MN qaybta 609.66 Subd. 1 (e) Hubka halista ah, dambiga; rasaasaynta uu baxsadku xigo.

2. Marka gaadhi lagu qabto rasaasaynta uu baxsadka xigo, sarkaalka nabada samaynaya qabashada waa in uu buuxiyaa foomka "Ogaysiinta Baabuurta lala wareegay ee Loo Adeegsaday rasaasaynta baxsadku xigo - Baabuurta loo Isticmaalay ku xadgudubka sharciga MN Qaybta 609.66 faqradiisa 1 (e)". Foomkan waa in si dhammaystiran loo buuxiyaa.

3. Foomka waa in loo qaybiyaa sidan soo socota.

   - Nuqullo caddaan iyo basali ah oo loo dirayo Dib u eegis Hantida Lala wareegay
   - Nuqulka jaalaha ah oo loo dirayo darawalka gaariga

4. Haddii darawalka, la siiyay ogeysiiska la wareegidda, uusan ahayn milkiilaha ku diiwaangashan sida uu qabo MN DVS, Dib-u-eegaha Hantida Lala-wareegay/la qabtay ayaa gaarsiin doona mulkiilaha diiwaangashan ogeysiis la wareegidda isagoo u soo marinaya boosto la hubo iyadoo la raacayo qodobka sharciga MN Statute 169A.63 Subd. 8 (b) Baabuurka La-wareegistiisa, Habka Maamulka La-wareegidda.

**H. Qorista Warbixinta Shuruudaha**

1. Sarkaalka/Baaraha hantida lala wareegaya waa in uu ku qoraa Warbixinta Booliiska iyada oo loo marayo qoraal sheeko ah oo hoos timaada CCN-da ku habboon.

2. Dukumeentigu waa in ay ku jiraan sharaxaadda:

   - alaabta la qabtay,
   - meesha hantida lagu diiwaan gelliyay,
   - magaca(yada) qofka(yada) la gaarsiiyay,
   - taariikhda foomka la wareegidda la gaarsiiyay,
   - Magaca sarkaalka nabada ee gaarsiiyay iyo

- Haddii ay shakhsi(yada) uu saxeexeen foomla ogaysiiska la wareegidda iyo haddii kale

3. Haddii ay suurtagal tahay, dhammaan warbixinnada hantida la hayo waa in lagu dhammeeyaa 24 saacadood gudahooda.

DRAFT